



1-877-600-VOTE (8683)



MN Relay Service: 711



secretary.state@state.mn.us

Hambalyo, waxaa laguu diwaangelin doonaa inaad codayso!

Iyadoo la raacayo codsigaagii u dambeeyay ee shattiga darawalnimada ama Kaarka Aqoonsiga Gobolka, waxaa laguu diwaangelin doonaa inaad ka codayso Minnesota.

2 daada xulasho

- **Waxba ha samaynin** waxaa laguu diwaangelinaya inaad codayso. Xafiiskaaga doorashada deegaanka ayaa kuu soo diri doona kaarka boostada oo ay ku qoranyihii degmooyinkaaga doorashada, xaafadaada (precinct), iyo goobta cod bixinta.
- **Diid in laguu diiwaangeliyo** haddii aadan rabin inaad isdiiwaangeliso ama aadan xaq u lahayn inaad codayso (faah-faahinta gadaal ka eeg). Ku soo celi foomka hoose 20 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda boostada laguugu soo diray markaa lagumaa diwaangelin doono inaad codayso.

Haddii aadan rabin in laguu diwaangaliyo inaad codayso

Calaamadi sanduuqa hoose, soo saxeex, oo soo celi foomkan haddii aanad xaq u lahayn inaad codayso (eeg dhanka dambe si aad u hesho faahfaahinta) ama aadan rabin in laguu diwaangaliyo.

1	<input type="checkbox"/> Sida uu qabo Xeerka Minn. Stat. 201.161 subd. 2, Waxaan diiday in la ii diiwaangeliyo amasi hordhac ah la iigu sii diwaangaliyo in aan ka codeeyo Minnesota. Ama, haddii ay ka badan tahay 20 maalmood laga bilaabo taariikhda boostada la iigu soo diray, oo horeba la iigu diiwangeliyay inaan codeeyo, waxaan codsanayaa in diiwaanka codbixiyaha la iga tirtiro si waafaqsan Minn. Stat. 201.13 subd. 4.
2	<input checked="" type="checkbox"/> Waxaan ku dhaaranayaa ama caddaynayaa inaan ahay qofka foomkan la siiyay. Saxiixa <input checked="" type="checkbox"/>
3	Soo celi foomkan Isticmaal baqshadda, email-ka, ama fakiska lagu siiyay.

Dhanka kale u rog si aad u hesho macluumaad dheeraad ah →

Minnesota dhexdeeda, waxaad xaq u leedahay inaad isdiiwaangeliso si aad u codayso haddii...

- Aad tahay ugu yaraan 16 jir si aad si hordhac isu diiwaangeliso oo aad tahay ugu yaraan 18 jir maalinta doorashada aad doonayso in aad ka codayso
- Waxed tahay muwaadin Maraykan ah
- Aad deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood ka hor maalinta doorashada
- Aadan ku jirin ilaalin ay maxkamadu amartay taas oo amarka maxkamadu uu kaala noqday xaqa aad u leeyahay in aad codayso
- Ayna maxkamad kugu helin inaad sharci ahaan karti u lahayn inaad codayso
- Aadan hadda u xirnayn xukun dembi culus; iyo



Haddii aad buuxin weydo midna shuruudaha sare, diid inaad isu diiwaangeliso adigoo isticmaalaya foomka ku yaalla dhinaca kale.

Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

- Dadka ka buuxiya arjiga hay'ad dawladeed oo u qalanta oo bixiya dukumeenti muwaadinimada Maraykanka ah waxaa loo diwaangelinaya si toos ah
- Si aan dib u dhac lahayn iskaga diiwaangeli internetka mnvotes.gov/register ama xafiska doorashada degmadaada
- Wakhtiga kama dambaysta ah ee diiwaangelinta hormariska ah waa 21 maalmood kahor maalinta doorashada. Si kastaba ha ahaatee, waxaad iska diiwaangelin kartaa maalinta doorashada goobtaada codbixinta. Booqo mnvotes.gov si aad u ogaato dukumeentiyada iyo aqoonsiga aad u baahan doonto si aad isu diiwaangeliso
- Qaar ka mid ah macluumaadka diwaangalinta codbixiyayaashu waa macluumaad dadwayne marka loo isticmaalo doorashooyinka, siyaasada, fulinta sharciga ama ujeedooyinka xulashada xeerbeegtida. Haddii aad qabto welwel xagga badbaadada shakhsiyeed ah, waxaad ka dhigi kartaa macluumaadka xiriirkaaga mid qarsoodi ah. Wac 1-877-600-8683 si aad wax badan uga ogaato



Booqo mnvotes.gov si aad u hesho halka aad ka codaynayso, si aad cadsato warqadaha codbixinta maqnaanshaha, si aad u firiso muunada cod bixinta, si aad u cusboonaysiiso diwaangalintaada, iyo wax intaas ka badan.

Khayraadka diiwaangelinta codbixiyayaasha ee luqadaha kale ah

Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa luqadahan laga heli karo mnvotes.gov/register ama adigoo sawiranaya koodhka QR.



Español

Soomaali

Русский

ພາສາວາງ

ଓଡ଼ିଆ

Hmoob

Tiếng Việt

中文

Oromo

አማርኛ

Dhanka kale u rog si aad u hesho xulasho dheeraad ah →